

TUSAALOOYINKA ARJIGA

Gacaliye Waalidka/Koriyaha: Dugsiyada Daweynaha Boston (BPS) waxay ka qayb galaan Barnaamijyada Umadda ee Qadada iyo Quraacda Dugsiga. Xaga Barnaamijyadan, wuxu ilmahaagu u qalmi karaa cuntooyin bilaash ah ama qiime jaban. Si loo helo u qalnooda ee ku salaysan shuruudaha dakhliga qoyska, waxa lagama maarmaan ah inaad buuxiso oo soo celiso Arjiga dhinaca gadaaleed. Waa in qoys kastaa buuxiyo oo soo celiyo hal Arji qoyskiiba iyo/ama halka *ilmood ee la koriyoba* Marka Arjiga la soo cesho, xubin ah shaqaalaha Adeega Cuntada iyo Nafaqaynta (FNS) baa horaantii qiimaynta u qalanka. 10 casho gudahood marka la helo arjiga, warqad baa guriga loo dirayaaa codsada wixi xog dheeraad ah ama qiimaynta rasmi ah ee derejada u qaalanka. Hoos waxa ah tusaalooyin faahfaahsan iyo qarar kale oo muhim ah. Hadaad u baahato in lagaa caawiyo buuxinta ama aad su'aalo qabto, fadlan wac 617-635-6371 ama 6372.

Qaybta 1. **Ardayda dhigta Dugsiyada Dadweynaha Boston oo KELIYA**

Qor magaciisa/magaceeda Dambe, Magaca Hore, Xarafka Hore ee Magaca Dhexe, ID# Ardayga, Fasalka, Magaca Dugsiga, iyo lambarka kiiska hadaad qaadato Kaalmo Ku Meelgaadha ah ee Qooyasaska Baahan (Temporary Assistance for Needy Families –TANF) ama Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance -SNAP). Hadaad in ka badan lix caruura kuu dhigtaan BPS, fadlan ku tax magacyadooda warqad gooni ah kuna lifaaq arjiga.

Hadii qoyskaagu qaatokaalmda SNAP ama TANF, waa in madaxa qoysku saxeeaxa arjiga Qaybta 6. Qoysaska qaata kaalmada SNAP ama TANF uma baahna inay ku sheegaan wax dakhli ah Qaybta 4 ee arjiga. Xaaska ka hela mucaawano Waaxda Mucaawanada Kalaguurka ama “DTA”, ee saxeeax kacafinta qarsoodiga (confidentially waiver), waxay toos ugu helayaan caruurtooda cuntooyin BILAASH ah. Waxa BPS kuu soo dirayaan warqad ku cadaynaysa in ilmahaagu helaan cuntooyin bilaash ah ogeysiina waxa helaya dugsiga (yada) ay dhigtaan. Hadaad warqadaas hesho, **loomu baahna inaad arji buuxiso.** Hadaadan helin warqad kuu sheegaysa in ilmahaagu u qalmo cunto bilaash ah, fadlan buuxi arji dhigaya lambarka kiiskaaga soona gudbi si loola xaalo. Fadlan xaqiiji in arjigaaga la saxeeaxo (qaybta 6).

Qaybta 2. **Hoylaawe/Qaxooti/Baxsad**

Hadii ilmaha aad u dalbaysaa yahay Hoylaawe, Qaxooti, ama Baxsad, ku qor X sanduuqa u banaan oo wac Mary William ee 617-635-8037.

Qaybta 3. **Caruurta Koriska ah (Foster Children)**

Hadii arjiga ilmo koris ah loo qorayo, fadlan sheeg ilmaha Magaca Dambe, Magaca hore, ID# Ardayga, Fasalka, Dugsiga iyo wixi dakhli uu “gaar u isticmaalo”. **HADAAD MID WAX KA BADAN OO ILMO KORIS AH HAYSO FADLAN U ISTICMAAL ARJID GOONI AH ILMIHII KASTA EE KORIS AH.**

Qaybta 4. **Xubnaha kale oo qoyska oo idil waa inay buuxiyaan qaybahaan (4, 5, 6)**

Qor magacyada qof kasta ee qoyska ah, dakhli haday helaan iyo in kaleba. Iskudar adiga, cunuga (caruurta) aad u codsanayso, caruurta kaloo idil, xaaskaaga, awoow iyo ayeeyo, iyo wixi ehelo ah ee idinla degan qoys ahaan. Isticmaal warqad kale hadii loo baahdo.

Qor dakhliga xubin kasta ee qoyska soo gala, cashuurta kahor (Dakhliga Guud), waxadna tustaa meesha dakhligu ka soo galo, sida mushahar, mucaawano iyo hawlgab, iwm. Cadee meeqa goor oo dakhligani soo galo: wiigiiba, Labadii wiigba, 2 X bishii, iyo buishiiba. Hadaad “Mucaawani Diid tahay” fadlan ku cadee sanduuqa u banaan. Hadaadan dakhli lahayn waqtiga aad codsiga cuntooyinka samaysay, fadlan ku tus sanduuqa ay ku dhigan tahay “Zero Income” (Dakhli Maleh).

Arjiga waxba lagama qaban karo haduusan lahayn lambarka “Social Security” iyo Saxeeex. Hadaadan lahayn lambarka “Social Security”, fadlan sax sanduuqa “ma haysto SS#”.

Takoorka

Hawlgalka barnaamijyada cuntosiinta ilmaha, wax takoor ah ilmaha laguma samaynayo xaga jinsi, lab/dhedig, midab, asalka umadeed, da' ama naafonimo. Hadaad rumaysan tahay in lagu takooray, waxad u qortaa USDA, Director, Office of Civil Rights, Room 326-W, Whitten Bldg., 1400 Independence Avenue SW, Washington DC 20250-9410, or call 202-720-5964.

Odhaahda Sharciga Shaqsinimo (Privacy Act Statement)

Qaybta 9 ee Sharciga Qado Dugsiyeedka Umadda wuxu dhigayaa in hadaan lambarka kiiska ilmahaaga ee SNAP ama TANF la qorin, waa inaad soo raacisaa Lambarka “Social Security”-ga ee madaxa qoyska ee saxeeax arjiga ama waa inaad cadaysaa inaad qofkaasi lahayn Lambarka “Social Security”-ga. *Shardiga Lambarka “Social Security” maaha khasab, laakiin hadaan la tusin Lambarka “Social Security”-ga innuusan lahayn qofka saxeeax arjiga, Arjiga lama ansixin karo. Lambarka “Social Security”-ga waxa loo isticmaali karaa in la cadayn xubinta qoyska marka lagu dadaalayo in la qeexo waxa run ka ah xogta Arjiga ku qoran. Dadaalladaas cadayntu waxa lagu fulinayaa dibufiirin barnaamijyo, xisaabi xilmale, dabagalyo, waxana xirii la yeelan karaan kuwa loo shaqeeyo, si loo hubiyo dakhliga, iyo la xiriirka Barnaamijka SNAP iyo xafiiska Welfareka (Transitional Assistance) si loo helo cadaymo shahaadada helitaanka kaalmda SNAP ama TANF, la xiriirka Xafiiska “State Employment Security Office” si loo hubiyo lacagta la siiyo, iyo xaqiijinta warqadaha xubnaha qoysku soo ban dhigeen si loo cadeeyo dakhliga soo gala. Dadaaladan waxay natijadu noqon kartaa in la waayo ama hoos loo dhigo mucaawanada, codsiyada maamulka, ama in talaabo sharci ah laga qaado hadii xog beenabuura la soo ban dhigay.*